

Juun

Qoyska qaaliga ahow,

Gu'gaan ardayda oo dhan oo dhigata fasalka koowaad ilaa fasalka lixaad waxaa loo qiimeeyey wax akhrin. Qiimeeynta waxaa lagu dhisay asaaska shakhsiga ayadoo la isticmaalayo liiska wax akhrinta aan rasmiga ahayn. Ardayga wuxuu isu akhriyaa sheekada wuxuu mar kale afka uga akhriyaa macalinka. Ayadoo la raacayo akhrinta sheekada, waxay mar kale ku sheegaan ereyo ayaga gooni u ah waxayna ka jawaabayaan su'aalaha.

Waxaynu rumeysan nahay in macluumaadka uu cunugaada ka kororsado qiimeeyntaan ay tahay mid waxtar leh. Waxaynu gaarsiineynaa wax akhrinta cunugaada heer wax lagu qiyaasi karo. Macluumaadkaan waxay naga caawiyaa sidii aan u qorsheyn lahayn galaas tababar oo haboon.

Liiska akhrinta ah cunugaada waxaa lagu tijaabiyey heer hooseeya. Tani waxay noo sababi kartaa ahmiyad gaar ah, si kastaba ha ahaatee xaalad walba waa mid fariid ah (wax la mid ah aan jirin) haddii cunugaada uu Ingiriis baranaayo wuxuu qaadan karaa inta u dhaxeysa seddax ilaa shan sano si uu u helo ereyada uu u baahan yahay si uu noqdo qof u akhrin kara Ingiriiska si aad u heer sareysa. Caruur badan oo ah kuwo "heerkoodu hooseeyo" dhamaadka heerka labaad waa su'aal saxan ama ka fog si ay u sameeyaan "heerka galaaska" kuwo ka mid ah. Si horumar leh ayay u noqdaan kuwo wax akhriya mudo bilo yar gudahooda ah. Kuwo ka mid ah waxay si fiican u macneyn karaan ereyada laakiin ma fahmayaan ama si wanaagsan uma xasuusan karaan waxa ay akhriyeen.

Mararka qaarkood cunuga si wanaagsan uma sameyn karo tijaabooyinka gaarka ah. Tababar dheeraad ah ayaa la siindoonaa cunugaada laga bilaabo Seteembar, horumarka uu sameeyana si ku dhow ayaa loo hor joogi doonaa. Waqtigaasi, waxa ugu muhiimsan oo aad ku sameyn kartid guriga inta lagu jiro kuleylaha waa inaad wax la akhrisid cunugaada ama aad u akhrisid ugu yaraan 20 daqiiqo maalintii; kalana sheekeeyso waxyaabihii aad u akhrisey. Caruurta waxay wax akhrinta ku bartaan ayagoo aad iyo aad wax u akhriya.

Haddii aan wada shaqeyno, waxaynu ku caawin karnaa cunugaada siduu wax u akhrin lahaa asagoo cidna aan ku tiirsanayn, taasi oo aan ahayn sheegitaanka ereyada laakiin uu la socdo fahamkooda. Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah ila soo xiriir adigoo xoriyad dareemaya.

Mukhlis

Frank Johnson

Maamulaha

952-928-6600